



Fasax-weyneyaasha Australia




Fasaxyada dugsiyada




Halkan Australia, dugsiyadu waxay bilowdaan dhammaadka ama bilowga Janaayo.

4

Waxaa jira 4 teeram dugsiyeed.



Teeram dugsiyeed kasta badanaa waa ilaa 10 asbuuc.



Waxaa jira fasax-gaaban ilaa 2 asbuuc ah ee dhammaadka teeram kasta.

Kuwaas waxaa kaloo loo yaqaan fasax-weynaha dugsiyada.



Fasax-weynaha dugsiyadu badana waa:

- Abriil
- Luuliyo
- Oktoobar




Waxaa jira fasax dheer oo dhammaadka sannad dugsiyeedka.

Wuxuu qaataa ilaa 6 asbuuc wuxuuna ku aadan yahay bilaha kulaylaha Australiyaanka.



Waxay bilaabataa Diseembar.



Waxay ku dhammaataa dhamaadka Janaayo ama bilowga Febraayo.



Dowlad-goboleedyada kala duwan waxay leeyihiin taariikho kala duwan ee:

- Teeramyada dugsiyada
- Fasax-weynaha dugsiyada

Fasax-weynaha dadweynaha



Fasax-weynaha dadweynaha, dugsiyada iyo badiba adeegyada dowladda way xiran yihiin.



Dukaamo badan ayaa sii furnaada.



Fasaxyada dadweynaha qaarkood ayaa meel kasta oo Australia ah ka dhaca.



Dowlad-goboleedyada kala duwan waxay leeyihiin fasaxyadooda dadweyne.



Badiba dowlad-goboleedyadu waxay u damaashaadaan Dhalashada Boqorada bisha Juun.



Taariikhaha qaar ka mid ah fasaxyada dadweynaha way isbaddalaan sannad kasta.



Fasaxyada Easterka waxay noqon karaan Maarso ama Abril.



Fasaxyada Easterka waxaa ka mid ah:

- Jumcaha (Good Friday)
- Axadda (Easter Sunday)
- Isniinta (Easter Monday)

Kuwaas waa maalmo muhiim u ah dadka kirishtaanka ah.



Halkan waxaa ku qoran fasaxyada dadweynaha ee qaraneed.

Janaayo 1da
Maalinta Sannadka Cusub

Kana waa bilowga sannadka Kaalandarka cusub.



Janaayo 26da
Maalinta Australia



Abril 25da
Maalinta ANZAC

Waxaan xusnaa dadkii ka soo qaybqaatay dagaaladii.



Diseembar 25da
Maalinta Kirismaska

Tan waa maalin muhiim u ah dadka
Kirishtaanka ah.



Diseembar 26da
Maalinta (Boxing Day)

Maalinta ka dambaysa Kirismaska waa maalin
dadka loo sameeyey inay si wadajir waqti
u-qataan.



Australian Government
Department of Social Services

Oo ay bixisay Haya'dda Caalamiga ee Socdaalka
ayadoo ka wakiila Wasaaradda Australia ee
Adeegyada Bulshada



IOM • OIM